Hoy Wadaag

Roommates

Aad uga fiirso marka aad dooraneyso qof aad hoy wadaag la noqoneyso

Waa laguu qabsan karaa waxyaabaha uu sameeyo ama uusan sameyn hoy wadaagaaga. Way adag sida loola dego qof aan u hogaansameyn sharcigan ama heshiiska kirada.

Yaa ku qornaanaya heshiiska kirada?

Dhamaan dadka wadda deggan ayaa ku qornaanaya heshiiska kirada. Haddii uu jiro heshiis kiro oo qoraal ah, qofna ma soo dajin kartid guriga iyada oo uusan ogolaan kireeyaha. Haddii aad ku darto ama aad ka saarto hoy wadaag, kala hadal kireeyaha wax ka bedelka heshiiska. Haddii aanu jirin heshiis qoran, waxaa laga yaabaa in aadan u baahan ogolaasha kireeyaha, laakiin waa fikraad wanaagsan in aad weydiiso. Haddii kale, kireeyaha waxa uu ku siin karaa digniin ah inaad ka guurto .

Aniga miyaa mas'uul ka ah waxa uu hoy wadaageyga sameeyo?

Haa Waxaa laga yaabaa in guriga lagaaga saaro heshiiska kirada oo uu jabiyey hoy wadaagaaga - sida sawaxan, maandooriye, xayawaanka dad la joogta ah oo aadan ogoloaasho, ama sharci kale oo uu jabiyey.

Yaa mas'uulka ka noqonaya kirada?

- Mid kasta oo ka mid ah dadka guriga wada dagan ayaa mas'uul ka ah **dhamaan** kirada, ilaa uu jiro heshiis qoraal ah oo si kale oranaya. Haddii hoyga wadaagaaga uusan bixin kirada, ama guuro, kireeyaha adiga ayuu kuu qabsan karaa kirada oo dhan. Haddii aadan bixin, waa lagaa saari karaa guriga. Si aanay taasi u dhicin, **waxa aad isku daydaa in aad heshiiska ku qorto in qof kasta uu mas'uul ka yahay oo kaliya qeybtiisa kirada**. Qaar badan oo ka mid ah kireeyayaasha ma ogola sidaas.

- Xusuunoow in aad saxiixdo, taariikhda ku qorto warqadda lacag bixinta - haddii aad u dhiibto hoy wadaagaaga ama kireeyaha. Haddii aad ku bixisoi jeeggag lacagta, waa in aad cadeyn lacag qabasho ka qaadataa kireeyaha!

Yaa mas'uul ka noqonaya biyaha iyo korontada?

- Haddii uu magacaaga ku qoran yahay biilka korontada iyo biyaha, adiga ayaa mas'uulka ah biilka oo dhan. Laakiin haddii 1 saacad laga xisaabo 2 ama wax ka badan oo guryo ah, inta badan kireeyaha ayaa mas'uulka ah. Eeg warqadayada xogta aruursan ee *Saacadda Biyaha Iyo Korontada ee La Wadaago*.

- Shirkadda korontada ayaa laga yaabaa in ay ku wargeliyaan in mid kasta oo ka mid ah hoy wadaagga uu mas'uul ka yahay biilka oo dhan, xitaa haddii uu magacaaga ku qorneyn xisaabta. **Waanu ku diidanahay.** Waxa aynu u heysanaa macmiilka ku qoran oo kaliya inuu mas'uul ka yahay. Haddii shirkadaha telefoonka, gaaska, korontada iyo biyaha doonayaan in aad bixiso biilka, oo aadan weligaa ogolaan adeega in magacaga lagu qoro, la xiriir xafiiska adeegga sharciyada ee degaanka (legal aid office). Waxa aad ka heli kartaa halkan www.LawHelpMN.org/so/providers-and-clinics.

- Kala hadal hoy wadaagaaga magaca lagu qorayo xisaabaha korontada iyo biyaha. Haddii magacaaga lagu qoray, ku talo gal in aad bixiso biilka bil kasta, haddii uusan bixin hoy wadaagaaga.

- Haddii aadan bixin lacagta waqtiga laguu qabto, waxaa laga qaadayaa lacagta la daahitaanka, ama waa lagaa jarayaa.

- Waxa aad heshiis la geli kartaa shirkadaha bixiya adeegga, si aad u bixiso lacag isku mid ah bil kasta. Marka ay sidaas dhacdo, qof kasta waxa uu ogyahay inta ku soo beeganta bil kasta.

- Marka aad wacdo shirkadaha korontada iyo biyaha, waxa ay ku weydiiyaan cidda kula deggan. Khasab kuguma aha **in aad** u sheegto.

- Haddii aad dooneyso in aan magacaaga lagu qorin, ha u dirin jeeg magacaaga ku qoran yahay shirkadaha. U sheegan qofka kula degan in uusan magacaaga siin shirkadaha korontada iyo biyaha. Oo hubi biilka bil kasta si aad u xaqiijiso in aan magacaagu ku qorneyn.

- Haddii aad u soo guurto qof lagu leeyahay lacag hore oo aan heli karin adeegga, waxa aad adeegga ku soo deysan kartaa magacaaga. Haddii adeegga laguu diido la soo xiriir legal aid.

- Waxa **aadan sameyn** karin waa in aad xisaabta la soo wareegto. Xisaabta wareejinta waa qof kula deggan oo lacag fara badan lagu yeeshay ka dibna xisaab kale lagu furo qof kale oo guriga degan iyada oo aan la bixin tii hore qofkii xisaabta hore ku qornaana guriga degan yahay.

Maxaan yeelayaa marka aan ka guuro?

Ogeysiis qoraal ah u qor kireeyaha. Haddii aad ku jiro heshiiska kirada, hubi muddo intee le'eg ah ayad u baahan tahay in aad ogeysiis ku bixiso. Haddii aadan ku jirin heshiiska kirada, waa in aad ogeysiis siisaa kireeyaha ugu yaraan bil ka hor xilliga aad guureyso. Dhinaca kale, si aad u guurto 31 Luulyo, waa in aad kireeyaha ogeysiiska siisaa Juun.

U qor dhamaan shirkadaha korontada iyo biyaha in xisaabtu ku qoran tahay magacaaga oo wargeli in xisaabta loo wareejiyo degaankaaga cusub ama jooji adeegga. **Qoraal ka dhig oo koobi** ka reebo. Haddii aadan wargelin, adiga ayaa weli mas'uul ka ah biilka qofkii kula deganaa.

Guriga maka saari karaa qofka ila degan?

- Inta badan kireeyaha oo kaliya ayaa qofka guriga ka saari kara. Waxa aad weydiisan kartaa kireeyaha inuu guriga ka saaro qofka kula degan, oo adiga uusan kaa saarin, laakiin taasi waa arrin oo khatar ah.

- Haddii uu qofka kula degan handadaad kuu geysanayo, ku qashqashaadayo, ama ku dhaawacayo, waxa aad codsan kartaa amar la idinku kala fogeeyo (OFP) ama amarka kala badbaadinta. Maxkamaddu waxa ay amri kartaa qofka kula degan inuu ka fogaado guriga aad wada dagan tihiin. Eeg warqadayada xogta aruursan ee *Amarka Amaan Helida iyo Amarka Khashkhashaada*.

Maxaan yeelayaa haddii qofka ila degan aanu bixineyn biilasha?

Waxa aad ka dacweyn kartaa maxkamadda dacwadaha madaniga ah Uma baahnid in aad qareen qabsato. Eeg warqadayada xogta aruursan ee *Maxkamadaha Dacwadaha Madaniga*.

Kireeyaha ma u heysan karaa lacagta keydka kirada wax uu sameeyay qofka ila degan?

Haa, laakiin waa in kireeyuhu raacaa sharciga u degsan keydka kirada. Eeg warqadayada xogta aruursan ee *Lacagta Keydka Ee Kirada*.

***Xog Ururs**an oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.* *Ha isticmaalaan xogtan ururs**an haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta ururs**an, ama aad ku hesho habab kale.*

© 2022 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.